



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA MAAJO 2023



Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Maajo 2023 ayaa gaaray 143.73, marka la barbardhigo 141.08 bishii Abriil 2023.

Isbedel bileedka, Maajo 2023, marka la barbar dhigo Abriil 2023, ayaa sare u kacay 1.88 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ahaa **Gaadiidka (+10.45 boqolkiiba) iyo Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska (+7.87 boqolkiiba)**. Sare u kaca **Gaadiidka** ayaa ka dhashay qiimo koror u ku yimid **adeegsiga Gaadiidka (+31.44%)**. Sare ugu badan waxaa ka qaybqaatay qiimaha lagu raaco **Gaadiidka dhulka(+49.21 boqolkiiba)**. Sare u kaca **Guryaha ,Korontada, Biyaha iyo Gaaska** ayaa ka yimid **kirada rasmiga ah ee guryaha (+12.99 boqolkiiba)**. Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha lagu **kiraysto qolalka (+25.00 boqolkiiba)** (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Maajo 2022 iyo Maajo 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare ukacay 6.59 boqolkiiba, marka la barbardhigo 6.15 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Abriil 2022 iyo Abriil 2023.

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Maajo 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Maajo 2023	
Tusaha bishan (Maajo 2023)	143.73
Tusaha bishii hore (Maajo 2023)	141.08
Tusaha sanadkii hore (Maajo 2022)	134.85
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	1.88%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	6.59%

HEERKA SICIR BARARKA MARKA LOO EEGO TSB-da

Isbedelka boqoleyda ee 12bilood.

Tixaca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Maajo 2023

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Maajo 2023

Heerka sicir-bararka bisha Maajo 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2022 iyo Maajo 2023.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 6.59 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Maajo 2022 iyo Maajo 2023, marka labar bardhigo 6.15 boqolkiiba 12kii bilood, Abriil 2022 iyo Abriil 2023.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ee Maajo 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 1.88 boqolkiiba.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Maajo 2023.


Heerka sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada**, **guryaha, biyaha**, **korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi ayaa hoos u dhacay -0.31 boqolkiiba, bishii Maajo 2023 marka la barbardhigo sare u kac gaaraya 4.61 boqolkiiba bishii Abriil 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada qutul daruuriga ah uu qiimahoodu hoos u dhaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 2.26 boqolkiiba bishii Maajo 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 6.60 boqolkiiba Abriil 2022.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 7.87 boqolkiiba Maajo 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 13.88 boqolkiiba Maajo 2022. Tan ayaa imaanaysa marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 5.71 boqolkiiba ee Abriil 2023.

Dhammaan qeybaha TSB-da & qeybaha laxushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Maajo 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 98.59 boqolkiib bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+ 150.00 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 13.88 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska & shidalka (+16.77 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 13.63 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+20.84 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diwaan galiyey sare u kac sanadle ah 9.49 boqolkiiba, bishii Maajo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+16.28 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 8.85 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha adeega Gaadiidka (+31.64 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 7.15 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+11.57 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 6.42 boqolkiiba Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Quraaradaha, Maacuunta & Agabka miisaska (+13.79 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 4.48 boqolkiiba Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kabaha oo gaaray (+7.54 boqolkiiba), sare u kaca waxaa sababay Kabaha Caruurta (+11.21 boqolkiiba).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 3.46 boqolkiiba Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabooyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

gaaray (+8.91 boqolkiiba).


- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 2.26 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay Maajo 2022 iyo Maajo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada (+2.14 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay qiimaha Qamadiga (+36.84 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Maajo 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Maajo.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicir bararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Maajo 2023 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Maajo 2023 (+)

- **Isgaarsiinta Korontada** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 13.63 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha telefoonka iyo qalabka telefax (+20.84 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac bille ah 10.45 boqolkiiba bishii Maajo 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha adeega Gaadiidka (+31.44 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa sameeyey sare u kac bille ah oo gaaraya 7.87 boqolkiiba Maajo 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey sare u kac dhan +12.99 boqolkiiba.
- **Cafimaadka** ayaa lagu diiwaan geliyey sare u kac bille ah 2.05 boqolkiiba, bishii Maajo 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha Agabka Caafimaadka (+6.65 boqolkiiba).

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Maajo 2023 (-)

- **Dharka & Kabaha** ayaa la diiwaan geliyey hoos u dhac bile ah oo gaaraya (-7.06) boqolkiiba hoos u dhaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (-9.08) boqolkiiba.

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Maajo 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Maajo 2022 TSB	Abriil 2022 TSB	Maajo 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan Qeybaha Tsb	100.00	134.85	141.08	143.73	1.88	6.59
Cuntada & Cabitaanada	46.04	148.49	152.33	151.85	-0.31	2.26
Tubaakadda	1.25	82.02	159.76	162.88	1.95	98.59
Dharka & Kabaha	5.03	147.53	165.84	154.14	-7.06	4.48
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	121.83	128.62	138.74	7.87	13.88
Agabka Guryaha	2.93	109.53	114.74	116.56	1.59	6.42
Caafimaadka	5.00	161.16	172.91	176.45	2.05	9.49
Gaadiidka	3.77	111.13	109.51	120.96	10.45	8.85
Isgaarsiinta	2.80	103.03	103.03	117.07	13.63	13.63
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	103.85	103.85	0.00	0.00
Tacsiinta	4.00	109.11	109.11	109.11	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.05	145.78	145.78	0.00	7.15
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.21	114.03	114.03	0.00	3.46

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Juun, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Juulay, 2023. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhamaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Maajo 2023 marka loo eego COICOPka

DHAMAAAN QEYBAHA TSB-da

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn ku saabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kala saameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.

War bixin bileedka bisha **Maajo 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia